



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay: <https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>.

Maarso 7, 2022

Ku socota: Dhammaan Shaqaalaha ODDS iyo Hawl-wadaagayaasha (CME-yada, fadlan dadka la wadaaga kuwa ka tirsan adeegyadiina iyo qoysaskooda.)

Ka socda: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS)

Ujeedada: Ra'yi Ururinta Ilmaha Qoyska ee NCI

Ra'yi ururinta Muujiyayaasha Xudunta u ah Qaranka (NCI) oo kale oo muhiim ah ayaa bilaabmaya bishani. Ra'yi Ururinta Ilmaha Qoyska ee NCI waxaa loogu talagalay carruurta qabta naafanimada maskaxda ama korriinka (I/DD). Waanu ognahay in sanadkii la soo dhaafay uu ahaa mid adag waxaan qof kasta uga mahad celinayaan fiirada gaarka ah ee ay siiyeen ra'yi ururintani.

NCI waa wada shaqayn ka dhaxaysa Ururada Qaranka ee Agaasimayaasha Gobolka ee Adeegyada Naafanimada Koriinka iyo Machadka Cilmi-baarista Adeegyada Dadweynaha. Afartan iyo lix gobol iyo District of Columbia ayaa ka qayb qaata mashruuca kaasi oo bixiya xog wanaagsan.

Mashruuca NCI ayaa dejiyay muujiyayaasha xudunta u ah qaranka oo la fiiriyo natiijooyinka loogu talagalay dadka iyo qoysaska helaya adeegyada. Muujiyayaashani waxay muhiimada siiyaan, shaqada, xuquuqaha, qorsheynta adeega, ka mid noqoshada bulshada, kala doorashada iyo caafimaadka iyo badbaadada.

Ra'yi Ururinta Ilmaha Qoysku waa ra'iyi ururin dhanka warqada ah. Waxaa boosta loogu soo diri doonaa dhammaan qoysaska haysta ilme qaba I/DD oo ku nool guriga qoyska oo hela ugu yaraan hal adeeg oo aan ka ahayn maamulka kiiska. Ra'yi ururintu waxay qaadan doontaa 20 daqiiqadood si loo dhammeystiro.

Ra'yi ururintani waxaa boosta lagu soo diri doonaa Maarso 2022. Qoysasku waxay haystaan fursad ay ra'yi ururinta kaga buuxiyaan dhanka internet-ka, taasi oo si toos ah u aada NCI, ama waxay ra'yi ururintooda oo dhammeystiran boosta ugu soo diri karaan Oregon Health and Science University (OHSU). Ra'yi ururintu waa mid qarsoodi ah. Qofna ogaan maayo sida aad u jawaabto.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan NCI, booqo <http://www.nationalcoreindicators.org/>. Ra'yi ururinta kale, dib u eeg farriimaha ODDS ay soo dirtay horraantii sanadkani ee ku saabsanaa [Ra'yi ururinta Barnaamijka Adult in-Person](#) iyo [Ra'yi ururinta Xasiloonida Shaqaalaha](#).

Wixii su'aalo ah ee ku saabsan ra'yi ururinta ee ka jira Oregon, fadlan Julie Hoyt kala xiriiir [Julie.Hoyt@dhsosha.state.or.us](mailto:Julie.Hoyt@dhsosha.state.or.us) ama telefoon ahaan 503-891-7405.

Si Deadname leh,



Lilia Teninty  
Agaasimaha  
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

*Farriintii Agaasimihii hore ayaa laga heli karaa*  
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

*Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.*

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.